

Talo wanaagsan oo ku saabsan safar dhaxa iyo bannaan hilib ku dubashada



Waqtiga kuleylaha iyo qorraxda, safar dhaxa iyo bannaan hilib ku dubashada. Dab xero oo habeenkii la shito ama sariir dhuxul ah si cuntada loogu karsado. Laakiin haddii dabku oo faraha ka baxo markaas halis ayuu noqonayaa. Sidee ayaad uga fogaan kartaa iney taasi dhacdo?

Noloshu guriga meel dibedda ka ah

Dadka jecel noloshu guriga meel dibedda ka ah waxay ku raaxaystaan in ay dab ku shitaan meel bannaan halka kuwo kalena ay doorbidaan in ay sii qaataan shooladda dibedda lala aado oo leh dabool dabaysha ka celiya si ay u isticmaalaan haddii cimiladu xumaato. Hoos waxaa ah xoogaa aaraa' ah oo ku saabsan looga hortagayo dab ka kaca duurka.

Dabka meelaha bannaan lagu shido

Marka ugu horreysa waa muhiim in la helo meel ku habboon in dabka lagu shito. Badanaa waxaad heleysaa goobo dabka loogu talagalay oo ku yaalla meelaha jasiiradaha u dhexeeya ama meelaha lagu socdo.

Haddii aysan jirin goobo dabka loogu talagalay oo dibedda ku yaalla markaas raadso meel ammaan ah oo dhowrsoon oo meel biyo lehna sida ugu suuragal-san ugu dhow. God qod ama dhagxaan dhardhaarro ah dhig dhoobada dhina-ceeda dabkana meel yar ku koob. Dab

dhagxaanta korkooda si toos ah loogu shido waa mamnuuc.

Haddii ay dabayl jirto markaas dhimbiluhu waxaa laga yaabaa in ay faafaan. Xaqiiji in dhinbilaha aan loo tuurin karin dhulka ama kaynta. Si buuxda dabka u demi ka hor inta aadan ka tegin isla markaana xaqiiji in dab shididda la oggol yahay. Dab shididda waa la mamnuucay waqtiga la saadaalinayo in dabku halis yahay 5.

Haddii uu dab faafu

Adeegyada samatabixinta ka wac 112. Isku day in aad dabka ka joojiso in uu faafu dhinaca dabayshu u socoto. Isticmaal laamaha geedaha yaryar ee spruce ama juniper adigoo qoryaha laamaha meesha ugu korreysa ee 1 mitir saaraya. Haddii ay suuragal tahay qoy laamaha. Si aad ah ha u garaacin dabka maadaama taasi ay keeni karto in dhimbilo duulaan oo uu dabku xawaare helo. Waxa gubanaaya oo dhan dhinaca dabka u xaaq adigoo laamahana hoos ugu riixaya dhulka si markaas aad dabka u cadaadisid. Dhinaca iska dhig laamaha qoryaha ah

isla markaana meesha ka saar wixii dhir caleemo leh ah ee dabka hortiiisa yaalla.

Marka aad dibedda wax ku karsaneysid

- Marna hilib ha ku duban ama holac ha ku dhex sameyn teendho ama gaadiidka la dul dego. Teendhadu si dhakhsa ah ayey u gubataa isla markaana biraha iyo alwaaxyada ku jira waxay sii daayaan kaarboonka sunta ah ee halka ogsijiin leh (carbon monoxide).
- Shooladda aad hilibka ku dubaneyso dhig meel siman oo aan guban karin ugu yaraan hal mitir u jirta teendhada ama gaadiidka la dul dego.
- Dareeraha dabka lagu shido dhig ugu yaraan meel makiinadda hilibka lagu dubayo u jirta 3 mitir.
- Marna makiinadda hilibka lagu dubo iyadoo aysan cidna la joogin ha ka tegin.
- Dhig dhuxusha la isticmaalay meesha loogu talagalay. Shidaalka loo isticmaalay dhuxusha makiinadda hilibka lagu dubo wuxuu sii xajisan karaa kulka ilaa 3 maalmood.

- Marna shidaal ha ku shubin shoolad shidan ilaa aad ka xaqiiqsato in holacu uu dhamaaday isla markaana gubashadu ay qabowday – haddii kale shidaalka dhalada ku jira ayaa qarxi karaya oo keeni karaya dhaawacyo gubasho oo daran. Dhaawacyada gubashada waa in lagu qaboojiyaa biyo ilaa toban daqiiqadood ama ka badan. Haddii dharkaaga uu dab qabsado dhulka dhig ka dibna isku duuduub ilaa uu dabku ka damo.

MAR KASTA WAC 112 HADDII UU DAB KU QABSADO

Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ku waa xubin ururro badan oo ka shaqeeya in ay Sweden ka dhigaan meel ammaan ah. Iyadoo loo marayo macluumaad bixin iyo tababar ayaan dadka, shirkadaha iyo ururrada ka caawinnaa iyo mas'uuliyad iska saaraan ka hortagga dabka. 08-588 474 00. www.brandskyddsforeningen.se